

# Waxa Adiga Kugu Waajibka Ah Inaad Ka Ogaato Shaqaaqada Qoyska

- Shaqaaqada qoysku waa gefka (abuse) loo geysto jirka, niyadda ama maskaxda ama waa ugu hanjabaadda gefka ee xubin qoys ama qof reer ka tirsan.
- Hay'adaha fulinta sharciga Ohio ayaa helay in ku dhow 72,000 oo soo wicid khilaaf guri ah gudihii 2006.
- Ku dhowaad 5.3 milyan oo dhibaataayn lagula kaco qofka la wadjiro ayaa ka dhex dhaca sannad kasta haweenka Mareykanka ee da'doodu tahay 18 iyo wixii ka weyn ah.
- Sannad kasta, in ka badan 300,000 oo haween uur leh ayey gef kula kacaan qofkay wada-jiraan. Dhagarta qofka laga galo ayaa ah ta labaad ee dhimashada la xiriirta-waxyellada ee haweenka uurka leh.
- Ku dhowaad 60 boqolkiiba ee dadka dhibbanayaasha dheddigga ah iyo boqolkiiba 39 dhibbanayaasha labta ah ayey daba socdaan (stalked) qofka ay wada-jireen. Boqolkiiba boqol marka la eego kow iyo seddeetan haweenka ay dab socdeen qofka ay wada-jireen oo iyaga qofkaas ay wada-jireen ku-xadgudbay.
- Qiimaha khasaaraha ay geysteen dadka ay wada jireen dhibbanayaasha haweenka ah ayaa ka badan qiyaastii \$5.8 bilyan sannadkiiba.
- Xubnaha qoyska ayaa gala bolqiiba 90 dembiyada la xaqiijiyey ee gefka iyo daayaca loo geysto dadka da'da weyn.
- Carruurta markhaatiga ka noqda shaqaaqada guriga ee hela caqli-celinta iyo daaweynta ayey ugu yartahay inay noqdaan dad ku-gafeyaal ama ay yeeshaan dhibaatooyinka shaqaaqada-la-xiriita markay weynaadaan.



OHIO DEPARTMENT  
OF PUBLIC SAFETY  
SAFETY • SERVICE • PROTECTION

## Xarunta Ka-Hortagga Shaqaaqada Qoyska

Oo Isku-duweysa Ohio kheyraadkeeda sidii loo Noqon Lahaa Qoysas Badbaado Qaba

[www.fvpc.ohio.gov](http://www.fvpc.ohio.gov)

1-888-448-4842

# Joojinta Shaqaaqada Qoyska Soo Noq-Noqodka leh . . .

U qorsheynta badbaadada ayaa muhiim u ah joojinta cilaqaadka qefka leh oo waa tallaabada ugu horreysa ee kala jabinta soo noqnoqshada shaqaaqada.

Qaar ka mid talooyinka lagu shaqeysan kara wax ka mid ah:

- ✓ Haddaad u cabsaneyso ammaankaaga ama waxyeello kugu dhowdahay, u wac 9-1-1
- ✓ Tilmaanso oo ku barbaro dariiqa aad ku baxsaneyso.
- ✓ U wargali saaxiib aad aamineyso ama qof jaarkaaga ah waxa dhacaya.
- ✓ Dhigo meel si diyaar ah aad uga qaadan karto dokumentiyada ay ka midka yihiin, liisannada wadaha, kaararka sooshal sekuuritiga, kaararka deynta, lambarrada akoonnada bangiga, daawo qorka, baasaboorrada, diwaanka dugsiyada, kaararka tallaalada, teesarooyinka dhalashada.
- ✓ Diyaarso bac ay kuugu jiraan sahayda aad u baahan doonto oo qarso.
- ✓ Soo ogow meesha shelter (gabaad) ku-meel-gaar ahi ku yaal.
- ✓ Dad ku-xadgubayaasha ah ayaa fiiriya goobaha internetka ee aad adigu booqatay oo xitaa ka akhriya kombiyuutarkaagii e-mail-lada adigu kuu gaarka ah. **Ka taxaddar:** Isticmaal kombiyuuter qofka xad-gudbaha ahi una si toos ah ama meel fog uuna marin uga helin karin, oo ay ka midka yihiin guriga saaxiibkaad aamineyso ama makatabadda.
- ✓ Ka fikir inaad sameysato taleefanka gacanta oo aad ugu wacdo bileyska haddii xaalad degdeg ahi kugu dhacdo.
- ✓ Raadso la-talin marka xaaladaha kurbada badani ku qabsadaan ee wax u dhima kartidaada aad ugu dareen-celineyso si-aan shaqaaqo u lahayn carruurtaada.

*Fikradaha, wax helitaannada iyo gabagabooyinka ama talooyinka qoraalka lagu daabacay waa kuwo u gaar ah qodka ama dadka qoray oo oo ugama tarjumayaan toos ah sidoodaba aragtida Waaxda Cadaaladda. Mashuruucan waxa taageeray Deeqda # 2003-DG-B0V-7239 ay bixisay Xafiiska Taageerda Cadaaladda, Xafiiska Barnaamijyada cadaaladda, Waaxda Cadaaladda Mareykanka, ee ay maamusho Xafiiska Adeegyada Dembiyada iyo Cadaaladda Ohio.*



**OHIO DEPARTMENT  
OF PUBLIC SAFETY**  
SAFETY • SERVICE • PROTECTION

[www.publicsafety.ohio.gov](http://www.publicsafety.ohio.gov)

CJS 0102 8/15 [760-1282]

**Si aad u Hesho Caawimaad, u wac:**

**Isku-Xirnaanta Arrimaha Shaqaaqada Guriga  
1-800-934-9840**

**Isbahaysiga Ficil-Ka Qaadka Ohio ee loogu  
talagalay Haweenka Gacanta loo Qaaday**

**1-888-622-9315**

